




(uten bilder)

Winnie Asara ✎
Magriet Brink 🗣️
Abdi Muse 📄
somal! 🗣️
niva 3 📄



Digaag iyo hangaraarac

Barnebøker for Norge

barneboker.no

Digaag iyo hangaraarac

Skrevet av: Winnie Asara

Illustrert av: Magriet Brink

Oversatt av: Abdi Muse

Denne fortellingen kommer fra African Storybook (africanstorybook.org) og er videreformidlet av Barnebøker for Norge (barneboker.no), som tilbyr barnebøker på mange språk som snakkes i Norge.

Dette verket er lisensiert under en Creative Commons

[Navngivelse 3.0 Internasjonal Lisens.](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.no)

<https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.no>





Digaag iyo Dixiri waxay ahaayeen saaxiibo. Laakiin had iyo jeer waxay ahaayeen kuwo tartamo. Hal maalin waxay go'aansadeen inay ciyaaraan kubadda cagta si ay u arkaan midka ah ciyaaryahanka ugu fiican.




Waxay aadeen garoonka kubada cagta
waxayna bilaabeen ciyaartooda.
Digaagadu waxay ahayd mid dhakhsa
badan, laakiin hangararaca ayaa kasii
dhakhsa badnaa. Digaagadu waxay u
darbaysay meel fog laakiin hangararici
ayaa u darbeyay meel kasii fog.
Digaagadu waxay bilaawday inay
darento xanaaq.



Waxay go'aansadeen in ay ciyaaraan gool ku laad. Waxaa goolhaye ku hormaray hangaraarici. Digaagtii waxay dhalisay hal gool oo kaliya. Kadibna waxay ahayd digaaggada markeedi in ay difaacdo goolka.



Laga soo bilaabo wakhtigaas, digaagga iyo hangaraacyaasha waxay is ku ahaayeen cadow.



Hangaraarici wuu darbeeyay kubadii waa uu na dhaliyay. Hangaraarici ayaa soo ceyriyay kubada wuuna dhaliyay. Hangaraaraci ayaa madaxa ku soo tuuray kubada wuuna dhaliyay. Hangaraarici waxa uu dhaliyay shan gool.




Digaaggadii waa ay qufacday ilaa ay qufacday Hangraaricii ku jiray caloosheeda. Hooyadii hangaraaraa iyo ilmaheedi waxay ku guurguurteen geed korkiisa si ay isku gu qariyaan.




Digaaggadu waxay ka cadhootay in ay guuldareysatay. Waxay ahayd kuuldareyste aad u xun. Hangaraarac waxuu bilaabay in uu qoslo sababtoo ah saaxiibkiisa ayaa ahaa mid sidaas u buuqa.



Digaaggadu waa aay daacsatay. Kadibna way liqday oo candhuuf tuftay. Kadibna way hindhistay oo qufacday. Oo qufacday. Hangaraaricii waxuu ahaa karaahiyo!



Digaagadii aad ayay u xanaaqday oo
waxay aad ukala qaaday afkeedi waxayna
liqday hangaraacii.



Hooyadii Hangaraaca aya ku qaylisay,
"Isticmaal awooddaada khaaska ah
cunugeyga!" Hangaraacyasha waxay
samayn karaan shir xun iyo dhadhan
daran. Digaagadii waxay bilawday in ay
darento xanuun.



Iyadoo digaaggadi u soo socotay guriga, waxay la kulantay hangaraarac hooyadii. Hangaraarac hooyadii baa waydiisay, “Ma aragtay ilmahaygi?” Digaagada waxbo maysan odhan. Hooyadii Hangaraaraca ayaa walwashay.



Kadibna Hooyadii Hangaraaraca waxay maqashay cod aad u yar. “Hooyo i caawi!” ayuu ku dhawaaqay codka. Hooyadii Hangaraarac waxay fiirisay agagaarka oou dhageysatay si taxaddar leh. Codka ayaa ka yimid digaaggada dhexdeeda.